# Xidigtii dagaara

Maansadan la magacbaxday "Xiddigtii dagaari" waxaa tiriyey Axmed Ismaaciil Diiriye(Qaasim) sannadkii1964kii. Wuxuu ku bilaabayaa sharraxaad uu ka bixinayo sida adduunku u hore-maray, halka la higsanayo, dedaalka loogu jiro in dayaxa la tago iyo guud ahaan aqoontu halka ay marayso.

Wuxuuna yidhi:

Dayaxaa la kala boobayaa iyo dirirkii cawleede
Xiddigtii dagaariyo la dhaaf diillintii Guray'e
Dibbaa laxaha loo eegayaa sacana waa daafe
Duqii samada lagu sheegayiyo dide cirjiidhiiye
Dabaylaha ragbaa kala yaqaan dawga loo maro'e
Hadba waqalka dihin Ruushku waw-doogsin cararaaye
Daruuraha la weeraray nin ogi dib uga faallooye

U fiirso tusaalayaasha runta ah ee uu abwaanku inna tusinayo. Wuxuu dadka u sheegayaa 1964-kii in Ruushku samada u socdo, in rag badan oo kalena ay xiddiga higsanayaan. Waxaynu xasuusannahay "Dagaalkii xidigaha" ee siddeetamaadkii dhexmaray Ruushka iyo Maraykanka. Hadaba aragtida Abwaan, Qaasim oo xilligaa ahaa nin dhallinyaro ah, wuxuu doonayey in raggaa lala tartamo, waana guubaabo ilaa maanta nool. Intaa marka uu dhaafo ayuu qeexayaa halka isaga iyo dadkiisii ay taagan yihiin.

Nin da'dii halkaa gaadhay oo daallanbaan ahaye
Hayeeshee dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge
Daab godina sooma jarin wiilashaan diraye
Halka dunida lagu geeddi yahay deyiba maayaane
Umaddii daryeel weli mahelin daacadda ahaaye

Sidii bay u dooyeysantahay damashii weyneyde
Sidii bay duleedada dharli'i ugu dabjeexaane
Sidii baa du'dada aar dhiciyo dacaw u joogaaye
Sidii baa dugaag uga gurtaa daaqa xoolaha'e
Sidii bay docu aqalladii uga daloolaane
Sidii baa darroorimada iyo daad u gelayaaye
Sidii baa degmadu ceelashii ugu darleeftaaye
Sidii baa ducaaloow! biyaha loo dawariyaaye
Sidii bay u daba goosi tahay haradii Dooloode

Oo weliba dibindaabyo-iyo diriri joogtaaye
Waakaa dareersaday Axmaar dayr cadkii dhalaye
Danbi ku hadli maayo'e ma'arag dawladdaan rabaye
Isma doorin gaalkaan diriyo daarta kii galaye
Dusha midabka soomaalibaad dugulka mooddaaye
Misna laguma diirsade qalbigu waadirkii Karal'e
Meeshaan dad aan urursho iyo darar ka eegaayey
Iyaba waa darxumo ii hadhaye dacar miyaan leefay
Ma dorraato raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay
Sidii aan deyeysanahay miyaan dawgii ka habaabay

Waxba hadalku yuu iladurkine waxan ku soo duubay
Mar uunbuu dafsoo odhan nabsigii diinku soo sidaye
Mar uunbay daruur caafimaad dooxa soo rogiye
Dirridaa abaarta ah marbaa doog kasoo bixiye
Dibjirkiyo reer miyigu marbay daasadaa qubiye
Mar uunbuu digiigixan raggii daalanaan jiraye
Dibnihii shakaallaa marbaa dooda loo furiye
Markaasaa la daydayan xaqii naga dahsoonaaye.

**Waa maxay dulucda gabaygu?**